INDHASARCAAD

•Riwaayad•



qore : Cali Sugulle

Telegram: @Somalibooks

INDHASARCAAD

(RUWAAYAD)

Waxaa Alifay CALI SUGULE

Telegram: @Somalibooks

Waa saabuuntii xumbadeedu
Saacaddu ay ku gudhaysay
Sida Soodhaha weeye oo
Wax kastoon ku samaynno
Saaka way yara qaylin
Saadanbaa - la xusuusan
Saakuubna waa la illaabi.

Sheekada Riwaayaddu waxa weeye sidii Soomaalida loo duudsiyay ee loo seejiyay xaqoodii, ayada oo gumaystuhu iyo wixii la halmaala ay tab iyo xeelad iyo xoog ku qabsadeen dad ka iyo dalka Soomaaliyeed, iyaga oo aan laga tala gelin ee mar walba cuskanaayey dano gaar ahaaneed oo uu gumeysigii hore iyo gumeysiga cusubi ka leeyihiin aawadood, maqaar saar, luggooyooyin iyo laandayro badan oo kala sidkay, kalana sakalay Ummadda Soomaaliyeed ayaa hadba lagu shirqoolaayay.

Riwaayaddu waxay ka sameysantahay shan qaybood ama jil oo mid waliba dhawr muuqaal yahay oo kala ah (1) Sidii loogu dhabbagalay ee gumaystuhu uu u duudsiyi lahaa iyo sidii Soomaalidu dawgeeda ay u doonaysay. (2) Habkii booraamo hadimo loo qoday (3) badheedhkii caddaa ee loo dhacay Soomaalida (4) dhiidhigii Soomaalida (5) galbashadii Enefdhii.

Riwaayadduna waxay faa'iidooyin badan u leedahay kobcinta iyo barbaarinta garaadka Ummadnimo ee Ubadka Soomaaliyeed, gaar ahaanna dhinaca siyaasadda iyo waddaninimada. Dadka waaweyn waxay u noqon kartaa xusuus halgankii gobannimadoonka ee ay soo mareen iyo jidka dheer ee inoo laaban, sidii aynu u gaari lahayn gobannimo buuxda, midnimo iyo horukac Qaran.

Indhasarcaad, xag suugaannimo, waa riwaayad ma guurto ah oo aad u heer sarreysa, afka ay ku qoran tahayna, waa mid fudud oo qof walba oo Soomaaliga si fiican u yaqaanna kasi karo, isla markaana eray doorashadeedu ay yihiin bar-ku-joog. Akhristuhu wuxuu riwaayadda ula socon karaa sidii qof goobjoog u ah waayo aragnimada ay u soo gudbinayso.

Riwaayaddu waxay isugu dhafan tahay: Qaybaha maansada Soomaaliyeed ay ka mid yihiin, gabay, geeraar, buraanbur,

Telegram: @Somalibooks

heeso, iyo jiifto. Kuwaasoo Riwaayadda awood dheeraad ah siinaaya si ay u xiiso geliso una soo jiidato dareenka iyo shucuurta akhristaha.

Cali Sugulle, wuxuu ku dhashay magaalada Oodweyne, kun iyo sagaal boqol iyo seddex iyo soddonkii (1933), wuxuuna ku barbaaray meelo kala geddisan oo ah Gobolka Waqooyi Galbeed. Wuxuu wax ku bartay Dugsiyada Berbera iyo Sheekh.

Cali wuxuu ka mid ahaa Dhallinyaradii qaybta weyn ka qaadatay bilowgii fanka cusub ee Soomaaliyeed ee ka hirgalay magaalada Hargeysa iyo magaalooyinka kale ee Waqooyiga, waxaana ka mid ahaa Ururrada badan oo xagga fanka ah ee ay ka mid yihiin, Almadar, (Sooba) iyo walaalo Hargeysa.

Cali tan iyo caruurnimadiisii wuxuu xiisayn jiray fanka waxayna u suurtogalisay inuu heer fiican oo bulshada la hor keeni karo ka gaaray. Heestiisii ugu horraysay ee hano qaadday (ayaa ila genbiya gumaysiga) waxa uu sameeyey 1956kii. Laga soo bilaabo taariikhdaas wuxuu tiriyay gabayo, geeraaro, heeso iyo riwaayado badan oo caan ah ay ka mid yihiin, Himiladeena (1960). Tusaalo (1962) Indasarcaad, (1963) Ma Huraan Afkii Hooyo weeyaaoo (1964) Dhagax iyo Dab Layskuma dhofto (1966,) sheeg iyo shareero (1969) iyo kuwa kale oo oo fara badan.

Cali wuxuu caan ku yahay aadna isugu tacallujiyaa qadiyadda Ummadda Soomaaliyeed iyo dhamaan himilooyinkeeda. Suugan kasta oo uu sameeyana waxa uu u adeegsan jiray arrimaha Ummadda Soomaaliyeed saamaynaaya ama taabanaya, xag daqaale iyo xag dhaqanba. Wax-yaalaha waaweyn ee uu ku muujiyay suugaantiisa dadkana ku boorinjiray, waxa ka mid ah baahidii loo qabay qoritaanka iyo koruqaadida Afka hooyo.

** Oggoli oo waxbarashadu way egtehee
Af shisheeye ayaynu addoon u nahee (1965)

** Hawlbaa horumaris leh oo lagu hagaagaaye
Haqab beelna waa xoogga aa ka hakranaysaane

Telegram: @Somalibooks

QAYBQAATAYAAL

DULMAR: Gabadh Gobanimo doonka reer Enefdhii ah.

DADAAL: Madax Soomaaliyeed.

DAACAD: Nin Soomaali ah.

DIIRIYE: Gobanimo doon Soomaaliyeed.

FADHIWEYN: Habar Soomaali ah.

DAALLIN: Ninkii Soomaalida kala qaybshey.

DUULAAN: Taageeraha Dambeed, isla markiina Jaallaha Daallin.

DAMBEED: Boqor Amxaaro.
Dab Sawaaxili: Madax reer Kiinya ah.

Telegram: @Somalibooks

INDHASARCAAD

JILLIDDA KOOWAAD

Muuqaalka Koowaad

Goobtu waa guriga boqorka, qolka soo dhoweynta. Dambeed wuxuu ku fadhiyaa kursi weyn oo ku beegan wajahadda irridka. Labada hareerood waxaa ka kala fadhiya askar.

Askari baa irridka ka soogelaaya wuu gurguurnayaa boqorkuuna u sheegayaa imaatinka wafdigii Dab Sawaaxili Nuur.

DAMBEED: (Kursigii buu ka soo kacayaa, markaasuu u imaanayaa, wey is gacan qaadeen, wey is nabdaadinayaan).
Dab Sawaaxili Nuuroow
Dadkaagu wuu ku jeclaayoo
Way ku dooranayaan
Kiiniyo danwadaag ah oo
Aad dul ahaan u sarrayso
Ayaan kuugu duceeyey

DAB: (UI sayn leh buu ruxayaa)
Kiiniyo Dawadaag ah
Waxba haygu dhacaynin
Kiinyo dagan maantoon
Weli Dawlad ahayn
Baan dambeedoow ka soodaaye,
Deris baynu ahayn
Dalkeenna isku yaallo
Dadkeenaan kala maarmin.
Waxaan doonayo maanta ee
Degelkiina I keenay
Danan leeyahay weeye oo
Kugu soo dacal dhawday ee
Intaanan diirka ka qaadin
Diyaar maw-tahay maanta oo
deg-deg mawga shirnaa?

Telegram: @Somalibooks

DEMBEED: Dab Sawaaxili Nuuroow
Horta, midi waa iga deeq,
Midna waa igu daw:
Midi waa iga deeqoo
Dalkanaan u sarreeyo
Haddii aad dan u leeday
Aad i soo dayday maanta
Daartii Xayle Salasoo
Dul iyo hoosba guduudan
Iyo dahab ayaad ku jirtaa oo
Malab ayaa durduraayee
Haw dayma la,aan
Taasu waa iga deeq.

DAB: Haye, Kow? Mahadsanid.

DAMBEED. Midina waa igu daw:
Dawladaa Afrikoo dhan
Anigoo u da'weyn
Kiinyoo dulman maanta
Wixii aad iga doonto
Anigaa u diyaar ah
Dowrkaagu yaanu ku seegine,
Dibnahuun kala qaad.

DAB: Duqweynihii Afrikaankow
Dawladaheeda dhammaan
Adigaa u da'weyn.
Dooroonoow boqorkii
Diirmadowda libaaxii
Dul ahaan u sarreeyow
Waad dareentay malaha oo
Warkeedu kaama dadnayn.
Siduu Daallin lahaa
Dalka Kiinya maanta
Inay dawlad noqdaan
Buu dambaskeedii hayaa
Degmadaa Enafdhiibaa
Dad Soomaaliya sheegtay
Danwadaagta an raacnoo

Telegram: @Somalibooks

Aan. Sawaaxili diidno
Dacwaddoodii ku dayste
Arrin ii daran weeye
Darajaan filayaa
Waa la i dooranayaa
Inta aan dallaacaayee
Dawlad aan noqonaayo
Waxaan doonayo haatan
Ma docday oo ma dareentay
Uma daacad heleeysidee
Malaa aan iska daayo.

DAMBEED: Haa,haa wad wad.

DIB: Cirkoo soo duma maantiyo
Dhulkoo hoos u degaaya
Iiga sii daran xaalku
Waxaan doonayey maanta
Adaan kuu dirayaayoo
Dabinkeedii xidhaaya,
Degmadaa Enefdhii
Lagu duudsiyilaa
Doodayada Ingiriiiiska
Waa inaad ku distaayoo
Aad ka daadejisaa
Haddii aan la afduubin
Illeyn way didsanyiin oo
Wayga sii durgayaane
Waa inuu xoog daldalaayoo
Wajeer ii duldhigaa
Ama lay dedejaayoo
Aniga laygu daraa.
Duqweynihii Afrikaankoow
Xaajadaa ku dadaal.

DAMEED Dab Sawaaxili Nuuroow
Horta degmadaa Enefdhii
Dad Soomaali ah maahoo
Anigaaba u diidanoo
Ii dan baanay ahayn.

Telegram: @Somalibooks

DAB. (Waar xaggey ka yihiin, weyska sheeganayaane)

DAMBEED: Kuwaa daawada yeeshee
Danwadaagta la leeyay
Dalka way ku murmaanoo
Sida daadka ayay
Iska soo daf yihiin
Xoolo daaqsato weeye
Doog bey raadinayaanoo
Marka roobku da'aabey
Iska soo degayaan.

DAB: Waar annagaa yaab aragnay: Waar annagaa yaab aragnay waa waxaa nahaysta.

DAMBEED: Duulku wayska sidaa
Weligaa dibindaabyiyo
Haka deynin danqaabo
Hadday doodi timaaddo
Daallin baynala meel ah
Haddii ay dirir gaadhana
Duullaan baynala jaal ah oo
Wayna daafacayaayo
Anaa kugu damiin ah.
Labadeenna dacood isku duubnaan
UI iyo diirka sidooda
Aan isku duuban ahaano.

DAB: Waa hagaag, isku dan, isku deyrnaan.
Labadeenna docoodna
Daafaca aynu wadaagno
Nahuurunna Itoobiya, Nahuurunna Kiinya
Nahuurunna Afrika.

Waxaa lakala saxeexanayaa heshiis gaashaanbuureed. Dambeed Xayle Salaasana reer galbeed buu u ambabaxayaa si uu Duulaan iyo Daallin ugala shiro sidii Enefdhii Kiinya loogu dari lahaa.

Telegram: @Somalibooks

MUUQAALKA LABAAD

Dulmar oo gabadh reer Enefdhii ah ayaa dacwaddeedii u jeedinaysa Dadaal.

DULMAR: Dhamac iyo gumaysi baa
Dhuxulo igu shiday oo
Wadnahay dhanqalan
Dhibic roobahoo dharbinaysa baad
Uga dhigantahay
ii soo dhawaw

DADAAL: Dhallaankii aan hadlanaynin
Hooyadii baan dhaadihaynoo
Caanaha aan dhadhansiinin
Aan is dhawaynee
Iisoo dhawow' (Jiib)

DULMAR: Dhudhun xoogliyo xoolo
Dhumucda aan isu gayno
Innagaa is dheelitiraynee
Gacmaha aan isu dhiibnee
Isma dhaafnoo waysu dhigannaa
Isma dhaafno
Aan is dhaweyno, Ii soo dhawow
Ii soo dhawow Ii soo dhawow (Jiib)

DADAAL: Dukusaaye gumaysi
Waa inta kuu dhabacdaaye
Ku dhufoo aad u dhirbaaxoo
Ku dhakhsoo haynaga dhoofee
Isma dhaafnoo waysu dhigannaa
Aan is dhawayno, Ii soo dhawow
Ii soo dhawaw Ii soo dhawaw jiib)

DULMAR: Anna dhiigga adna dhuuxa
Wadnahaygaad ka dhignaatoo
Miyirkaygaad ku dhisnaataye
Isma dhaafnoo waysu dhigannaa
Aan is dhawayno, Ii soo dhawow
Ii soo dhawow, Ii soo dhawow (Jiiz)

Telegram: @Somalibooks

DADAAL: Amba dhaabee adna dhidiboo
Waan dhantaalnee aan dhammaadee
Adiguun bayga dhinnaaye
Isma dhaafno waysu dhigannaa
Aan is dhaweeyno, Ii soo dhawow
Ii soo dhawow, Ii soo dhawow (Jiib)

(Golaha ayaay baxayaan)

MUUQAALKA SADDEXAAD

Dambeed, Daallin iyo Duullaan baa soo gelaya.

DAALIN: Galab wanaagsan

DAMBEED: Bal gankaan ahay eega
Gadahaygana fiirsha
Immisaa laygu gabraartoo
Afrika aan geyigeeda
Gaadiid qaad bixinaayey.
Markuu meel gilgilaayo
Garbi baa layga dhigtaa
Reer galbeed giddigii
Uu ku soo gabadaa.
Waxa aan gudo maanta'aan
Idiin galo caawa iyo
Gacan saarkii dhexdeenna
Inta aynu gar qaadno
Wax gumaystadeennii
Is gargaari ogeyd
Garowsho aan isa siino.

DAALLIN: Yes! Yes! That is right,
Waa yahay, waa daw.

DAMBEED: Guntii xaalkii dhexdeenna
Inoo gooni ahaa ee
Inoo gaarka ahaa
Siyaasaddii guntanayd
Daallinow sow garanmeysid
(Aamus cabbaara)

Telegram: @Somalibooks

Afrikoon kala goyno
Soomaaloon kala geyno
Midba gees u afduubno
Miyeeynaan ku guddoomin

DAALLIN: (Madax rux) Haa! Haa! Waa xasuusnahay.

DAMBEED: Gelinkii dambe
Maalintii ay kala guurka ahayd
Galabtii casarkii
Gabbalku liiqa dhigaayey
Gadaalkii makhribkii
Aanay gaadhin caweyska
Todobadii galawdeeda
Saacaddoo ku gammuuran oo
Aan goo go' lahayn
Daallinow soo garanmaysid?
Goob joog baad ka ahayd!

(Hor iyo gadaal iyo hareeraha, dhaqaaq joogsi buu billaabay)

DAALLIN: Yes! Haa!
Goob joog baan ka ahaa
Siyaasadii guntanayd

Guddoonshaan ka ahaa.

DAMBEED: Waan kuu guud marayaaye
Maxaa kaala gudboon?

DAALLIN: Duullaanoow godob raagtayoo
Gurigiisa dhextaal
Buu Dambeed soo qodayaa
Anigoo garanaaya
Xaajaduu gocanaayo

Kama gaagixinaayee

Bal ma kuu godliyaa?

Telegram: @Somalibooks

DAMBEED: Haa, Haa!

DAALLIN: Arrintii guracneeydee
Inoo gaarka ahayd
Waxa igala gudboon
Anigoon geesna ka dhaafin
Maxaa keenay golaha?
(Miiskuu dharbaaxayaa)
Maxaa keenay golaa?

DUULAAN: Maxaa keenay golaa; Dambeed

DAMBEED: (Naxsan, hantaatac) AAA, III, EEE....

DAALLIN: Maxaa keenay golaa?

DAMBEED: Waxan u golleeyahay
Ee galabta arrinteeda
Imminka keenay golaa
Ayaan idiin gelayaaye
Idinna iiga garaaba.

DAALLIN: Ihii, Ihii.

DAMBEED: Siyaasaddii guntanayd
Ayuunbaan la garriiray
Gayigaa Enefdhii
Haddii aad ka garoocdoo
Kiinya aad kala goysid
Soomaalaan igafaynin
Oo u soo gurmanayso
Dalkoodaan ii gadmanaynin
Ay ku geediyiin.
Afrika geeska ku yaal
Reer galbeed giddigii
Hadduu maanta ka guuro
Sow inoo guuldarro maaha.

DAALIN &
DUULAAN: (Isku mar) Waa inoo guuldarro

DAALLIN: Geyigaa Enefdhii
Geestaan raacin lahaa

Telegram: @Somalibooks

Geedba kaagama toosnoo
Taa garteedu ma laabna, Dambeed Xayle.
Garaad baanad lahayn
Waxbaa guuraya meesha
Geesey xaajadu leeday
Aanad ii garannayn
Soomaaloon geyigeeda
Gobolka ugu wanaagsan
Hore kuugu garoocay
Aad la gabaara gurdaysay
Haddana sii kala goyoo
Ayagoon is gelaynin
Kiinya uun ku gufee
Waanay suura galaynoo
Waan ka giigay midkaasoo
Waan ka gaabsanayaa
(Duullaan buu u iljabinayaa)

DUULLAAN: Dambeed Xayle Salaasow
Daallin kuu gabban maayo
Iskumuu toosinin geed
Sidaad guul ku helayso ee
Aad ku gaadhilahayd
Garab uu kugu biirshiyo
Gacan uu kugu siiyo
Baa idiin gooni ahayd
Hayeeshee godobtii aad
Adigu guuddka ku qaadday
Anigaa u guntanaaya
Gurigaa Enefdhiise
Sidaa uu uga giigay
Baan uga gaabsanayaa
Gelimaayo gartiisa
Idinku isla gorfeeya

DAMBEED: Wax gumeysatadeennii
Is gargaari ogayd
Xaajadaynu goorfeeynay
Gadaal bay ka xumaatay
Garbo weeye dhankaasi
Gebi weeye docdaasi

Telegram: @Somalibooks

Gunteedii walac weeye
Godkii aynnu qodeynee
Soomaali aan ku guraynay
Maygu soo gambideenoo
Mataasaad garateen?
Matasaad garateen
Ma sidaasaad garateen?
(Dibedda ayuu u baxayaa isagoo cadhaysan)

DUULLAAN: (Dambeed buu la faqayaa, hoosna ugu sheegayaa.
Bal aniyo Daallin baa wada hadlaynee noo faqdaa.
Daallin, Dambeed waad aragtaa
Doodiisiina waa ka caddeeyey
Duqu waa dudayaa
Wuxuu daw u lahaa
Adigaa dacwaddeediyo
Dambaskeeda yaqaanne
Xaajaduu diirka ka qaaday
Aniga wayga dedneyd (Aamusyar)
Dayaxaa bari gaadhay
Inta aan dabajoogey
Aan Galbeed daafac lahaa
Talo kale wayga dednyd
Dambeed waa ka cadhoodee
Shirkeennii ka dudaaya
Arrinta maanta daqmaysa
Adigaa daawadeeda
Deenyaqaad u lahaa.
Ta kale ka danbysa
Dab Sawaaxili waa kan
Kugu soo degdegayaa
Isagaan dawlad ahayn
Dan kaluu u socdaa.
Dul ahaan arrintoo dhan
Isku soo wada duub oo
Adiguun baa u damiin ah (Aamus yar).
Degmadaa Enefdhiina
Dad Soomaaliya weeye
Danwadaagta aan raacno

Telegram: @Somalibooks

Bay dacwaddeedi hayaan
Duulkii foosha xumaaye
Dhulkan aad degeneeyd
Dunjigiisa lahaa
Hadday maanta damceen
In ay dawlad noqdaan
Ooy danahooda fushaan
Door maxaad bidilayd

DAALLIN: (Aamus cabbaar ah) Look! Duullaan.
Degmadaa Enefdhii
Dad Soomaaliya weeye
Waa se dal Kiinya seero
Iyo dan danwadaag la ahaa.
Haddii layga diraayoon
Dibadda ugu baxaayo
Intaanay dawladda qaadan
Waa inaan jar degaayoo,
Degelkooda dhexdiisiyo
Duddadooda fadhiisto
Ayaa ii dan ah maantoon
Dariiqeedii hayaa.

DUULLAAN: Waa tahay.

DAALLIN: (xanshashaq)
Daaqsin geel hadal jooga
Anaa kuu dulmaraayee
Dedan weeye midkaasiye
Ha ka qaadin daboolka
Dibnuhuun ka adkow
Cidina yaanay dareemin
Dabin baan xidhayaayoo
Calaalkaan duldhigaayaan
Dayn ka soo lulayaa
Dalluun baan qodayaayoo
Iyadoo hoos u daloosha
Aan afka dooga ka saaray
Intaan ciid ugu daadsho
Dushana aan salabeeyo

Telegram: @Somalibooks

Ha la moodo daleed

DUULLAAN: Ha lagu daato dabeeto

DAALIN: Hadii aan dooda rogaayo
Enefdii darayeeyo
Dab Sawaaxili siiyo
Miyaanay doogsin ahayn
Reer galbeedku ku daaqo

DUULLAAN: (Qosol) Ha, Haa .....HAAA! Ilama aha, Sidee?

DAALIN: Sidee baanay u ahayn?

DUULLAAN: Daallin!
Degmadaa Enefdhii illayn
Kaama dahsoonoo
Dad Soomaaliya weeye
Dood aan ku soconayninoo
Dib u soo noqondoontiyo
Deelqaaf kuuma habboona,
(Aamus yar)
Immisaad dabin qooshay
Callaalkaad dul dhigaysay
Daf la soo odhanaayey oo
Lagu daadan oggaa
Dundiu maaha sidii
(Codkuu bedelayaa si kulul)
Sidee baad tahay Daallin
Dunidu maaha sidii
Dadkii wey ilbaxeenoo
Maanta waa didsanyinoo
Inta ay is dadbeen
Mindidaad ku dileysay ee
Weligood dabar goysay
In ay daabka qabtaanoo
Adiga ay ku dilaan
Bay diir madoowdii rabtaa
Soo kuwaa ku diraayee

Telegram: @Somalibooks

Aad dibadda uga baxaysid
(Codkuu bedelayaa si qabow oo gaagaabsi ah)
Dambeed baad badh ka siisay
Ay ka dagaalansanyiin
Soomaali haynagu daarin
Mar labaad dagimaysid
Anigu waan kuu digayaa
Enefdhii iska daayoo
Haw duduucin Sawaaxil
Anigu waan kuu digayaa
Wax yar baa inagaga hadhay Afrika
Faraheennii ka baxday Afrika!

DAALLIN: Si aanay faraheenna uga bixin Afrika, isla
Markiina uga baxdo anigaa taladeedii kuu ha-
ya ee iga dhegeyso.
Diir madow ha collowda
Danteenii ku jirtaa, ma garatay?

DUULLAAN: (Madaxuu ruxayaa) Gartay

DAALLIN: Callaalkii aan deldelaayey
Waa dalkaa Enefdhii
Docdaan raacin lahaana
Iilayn kaama dahsoonee
Dal Sawaaxili weeye
Dal Soomaaliyi leeday
Maxaa iiga dareera
Ee layga daadinayaa?

DUULLAAN: Waxba

DAALLIN: Ma dadbaa iga joogoo layga dayrinayaa

DUULLAAN: Maya
DAALLIN: Ma cirkaa igu dumaaya
Ma cirkaa igu dumaaya
Haddii ay u darraato
Iyaguumba isdilaayo

Telegram: @Somalibooks

Deeruun baa diin hardiyeeysa
Dameeraa weylo dhalaaya

DUULLAAN: Haa .... Deeraa!
Diin hardiyeeysa.

DAALLIN: Joomana waan dagayaa!
Joomana waan dagayaayoo
Hadduu doog miranaayo
Waxoogaa ugu sii dar
Haynoo daayo dhulkeynu
Ku dul buuxin lahyn.
Hayga moodin daryeel
Wowga sii darayaa.
Dambeed Xayle Selaasana
Docdiisaan la jiraaye
Ogaan baan ugu diidoo
Isagaan ku dayaayey.

DUULLAAN: Dambeed Xayle Selaasna
Sidu doonaayeey weeye

DAALLIN: (Qosal)
Wajeertaynu duwaynay
Haddii aynnu duduucno
Haddana dayr kaga oodno
Dusduskaan ku libaystay ee
Dunidu igu tiqiin iyo
Sow daf iyo midiq maaha

(Gacmahaa laysu dhiibay oo qosal bay ka kacayaan Dambeed-na keddis buu ku soo gelayaa. Duullaan iyo Daallinna weey is aamusiinayaan.)

DUUALLAN: Suu

DAALLIN: Suus, soo dhawow Dambeed.

DAMBEED: Xaajadaydun gasheen aan
Go'aankeeda sugaayey
Miyeydinaan ka gun gaadhin?

Telegram: @Somalibooks

DUULAAN: (Degdeg) Haayoo waan ka gungaadhnay

DAALLIN: Haa, haa, xaajadii ka gungaadhnay

DAMBEED: (Isagoo cadhaysan ayuu cod kulul ku yidhi)
Geyigaa Enefdhii
Gartiisoo aad cuyuubtaan
Iyo innagoo kala guurra
Oo isugoyna xidhiidhka
Labadaa mid guddoonshoo
Go'aankeeda isiiya
(Waa la wada aamusayaa cabbaar)

DAALLIN: (Tixraacaaya kala guurka uu dambeed shee gay.)
Innagoo kala guurra oo
Isku soo geli weeyna
Iyo geyigaa Enefdhii
Oo gartiisa aa cuyuubtaan
Labadaa mid guddoonsho oo
Go'aankeeda isiiya (Aamus yar.)

DAALIN: midi waa gar cadaawe

DUULLAAN: Gar cadaawe

DAALLIN: Midina waa isku gayn

DUULLAAN: Isku gayn xeer jabjab
DAALLIN: Midi waa gar cadaawoo
Innagoo isku gees ah
Oo Soomaali u gabbaayna
Xidhiidhka aan isu goyno
Gallad baanay ahaynoo
Iyada loo dhelimaayo
Oo taasi waa gar cadaawe (Aamus yar)
Midna waa isu gayn
Iyo isgargaarka dhexdeena
Halkii aad garab saarto
Ayuun baan gacan siin

Telegram: @Somalibooks

DAMBEED: (Wuu dhoola caddeeyey)

DUULLAAN: Haa. halkaad garab saarto
Ayuun baan gacan siin

DAALLIN: Wixii aan ku gafaayey
Iyo godobtii ka timaada
Anaa saaraya guudka
Gobolkaa Enefdhiina
Soomaali loo gudbin maayo
Geestii aad la jeclayd
Ayaan kuugu guddoonshay
Adaan guushii ku siiyey.

DAMBEED: (Gosol)
Waan ka filaayey sidaa
Goor hore maad itidhaahid
Guushan aynu wadaagno
Iimay gooni ahayne
Giddigeen waa galladeenna
Oo Guddoon weeye wanaagsan.

Saddexdoodii baa saddexda gacmood is qabsanaaya. Xayle dhexduu ku jiraa golahana way ka baxayaan iyagoo qoslaya.

JILKA LABAAD MUUQAALKA KOOWAAD

Dambeed oo ergadii loo diray ku soo guulaystay kana yimid Daallin iyo Duullaan baa la kulmaaya Dab Sawaaxili oo sugaayey kulana kulmaaya gurigiisa; salaan diiran iyo isbogaadis bilaabay.

DIB : war dambeed saw nabad maaha.
Dab Daallin mays aragteenoo
Daalin mays aragteenoo
Dacwadaan u lahaa aan

Ergada kuugu diraayey
Wixii ay ku dambaysay
Dabuubteeda i sii

Telegram: @Somalibooks

DAMBEED: Daallin waa is aragnoo
Doodii waanŋu ku raagnay
Hadalkii waa naga duulay
Duullaan baa nala joogay
Aŋigoo dudilaa
Dibadda u bixilaa
Uu shirkii dumi gaadhay
Danaha aan jsu leeŋiyo
Markaaŋ dowgii caddeeyey
Derisnimada ahaa
Ayuu soo debcay xaalku
Inkastoo aaŋu ku daalay
Dacwaddii wuu na[illegible]ɹ yeelay
Degmadii Enefdhi iŋ
Uu raacsho docdaada
Waa inoola diyaar
Ee ma ku deeqday sidaasi?

DAB: Wey i deeqday sidaasi. Mahadsaŋid

DAMBEED: (Qosal) haa haa.

DAB. Sidaan docnaayey weeye
Dambeed Xayle Salaasow
Cadowgaa kuma dooxo
Weligaa ka dulleeystee
Dusha jooga ahow
Duulka Soomaali la leeyey.
Dalkeeneey sheeganayaan
Ooy duulimaad ku yihiiŋ
La[illegible]ɹadeenna docoodba
Ayŋu dooda adkayno
Dagaalka aynu u midowno
Daafac aynu adkayno
Gaashaanka aynu u daruurro

DAMBEED: Gaashaaŋka aynu u daruurno

Daafaca ayŋu adkayno
Labadeenŋa docoodba
Dagaalka aan u midowŋo

Telegram: @Somalibooks

DAB Sawaaxili iyo Dambeed baa is gacan qaadaayo kuna dhawaaqaaya isku mar.

Gaashaanka aan u daruuro

MUUQAALKA LABAAD

Dulmar oo gabadh reer Enefdhii ah oo tiiraanyeeysan ayaa la kulmaysa Dadaal.

LOLMAR : Dullyste iyo dillaabaa

DULMAR: Dabarkiisa gumeysi
laba dible iigu xidhayaa
Xaqaygey dadayaanoo
Wixii aan dowga u yeeshaa
Leyga duudsiyayaayoo
Anigoo idin doortay
Isku dad baynu ahaynoo
Isku dal baynu ahayn
Danwadaagta haddii
Laygu soo dariwaayo
Sow ayaan darro maaha

DADAAL: Haa haa

DULMAR: Dirir baan gelayaa
Dhiig baan daadinayaa
Dagaal baan ridayaa
Dunidoo dhan dhammeeya
Ee wixii dood iyo deeq
Iyo dabba lay huri laa
Diyaar ii la ahaada.

DADAAL: Danwadaagta haddii aad
Ku soo darmilayd
Kuwii dayrka sameeyey ee
Innagoo isku duuban
Midba gees u afduubay ee
Dalkeenii kala qaybshay
Da'deen weeye illeyne

Telegram: @Somalibooks

Haddii aynnu is doono
Isuma keen diidikaraan
Isku dad baynu ahayn
Haddii aad dulligii
Dabarkiisa Furayso oo
Gumaysigii ku daqmaayo
Dabuubtaa aad ku dhawaaqday
Haddii aan dulmaray
Waxba kaaga dambayn
Innagoo isku diir ah
Dad ahaanna midownay
Dal ahaanna wadaagna
Ayeynu daawo lahaan
Waa inaad degdegtaa
Oo dadaal aad kordhisaa
Wixii kuu dana maantana
Dowgii aad u maraysay
Wixii kaa duwa diid
Haddii aad is daryeesho
Oo dabkii aad hurinayso
aad ku diirsanlayd
Wuu kuu daarmi ileysku
Inaanan duunyo iyo dood
Iyo dagaal kaa la hadhayn
Yididiilo dubaax leh
Dubaaqaaga u sheeg.
Daallinna waan arkayaayoo
Waa nimaan diini xidhaynoo
Laba dubleeya waqii (Cod Yar)
Daacad inoo noqon maayo
Sida uu damcay maanta
Waan u duur xulayaa
Wixii ay ku dambaysiyo
Aynnu duugana dhowro

Dulmar: Waan dadaali
Dadaal baa u tegaaya Daallin kalana hadlayaa arrinta Enefdhii iyo docdii la raacinlahaa.

(Golaha ayeey ka baxayaan)

Telegram: @Somalibooks

DADAAL: (Warqad buu u dhiibayaa)
Dacwadayda Enefdhii halkaas ayeey ku taal iyadoo dhan.

DAALLIN Annagoo dowlad ahaan
Dhul ahaan gebigeeda
Dunida ugu sarayna
Dadkuna uu nayaqaan
Wax inaan dudunaa
Dowba waanay ahyan
Dalka kiinyi leedahay
Dab Sawaaxili sheegtay iyo
Soomaaloo danwadaag ah
Degmadaa Enefdhii
Docday raacilahayd
Guddaan soo dirayaa
Kala doorta tidhaahda
You understad?

DADAAL: Hayee.

DAALLIN: wax walba diyaar
I am ready for everything.

(Gola way ka baxayaan)

Dadaal ;markuu ka soo laabtay Daallin ayuu dulmar u wariyey wixii ay ku wada hadleen Daallin iyo waxa uu ka damacsanyahay Enefdhii.

DADAAL: Daallin waan arkay maanta oo
Dood xaggaaga ku saabsan
Oo danwadaagta ka jeeda
Iyo dacwad ayaan u lahaa
Sidii dowga ahayd
Isagoon ka dulboodin
Hadalka wuu depcinaayey
Degmada Enefdhii
Guddaan soo dirayaa
Docday Raacilahayd
Kala doorta tidhaaha

Telegram: @Somalibooks

Ayuu arrinteedii ku daayey
Wuu i deeqay midhkaasi
Oo dhaxantii waa iga duushay
Dulmareey adna maanta
Xil weyn baa ku dulsaaran
Doorkaa yaanu ku seegin.

HEES

DADAAL: Inta ay dhulkeennii
Qoqobuhu dhexyaaliin
Aan kala dhantaalahay
Haddaan dhimashoy ku diido
Hadaan dhalashoy ku sheegto
Haddaan dhaqashoy ku raadsho
Haddaan dheregow ku doono

DULMAR: Intaan Afrika dowr ahay ee
Aan nabad ku dholol ahay
Dhuunta ay i jarayaan
Haddaan dhimashoy ku diido
Haddaan dhalashoy ku sheegto
Haddaan dhaqashoy ku raadsho
Haddaan dheregow ku doono

DADAAL: Inta gacan la dhowraayee
Afkuna aanu dheereen
Dhalanteedka ay tahay
Haddaan dhimashoy ku diido
Haddaan dhalashoy ku diido
Haddaan dhaqashoy ku raadsho
Haddaan dheregow ku doono

DULMAR: Intuu dayaxu dhicis yahay
Xidhiguna dhammays yahay
Nabsina dhoof ku maqan yahay
Haddaan dhimashoy ku diido
Haddaan dhalashooy ku sheegto
Haddaan dhaqashoy ku raadsho
Haddaan dheregow ku doono

Telegram: @Somalibooks

DADAAL: Inta aad ka dhimantahay
Magaca aan ku dhaadanaayoy
Xornimo waa iga dheertahay
Haddaan dhimashoy ku diido
Haddaan dhalashoy ku sheegto
Haddaan dhaqashoy ku raadsho
Haddaan dheregow ku doono

DULMAR: Inta wiil dheegeen ihi
Dhalan-keena neceb yahay
Aynu dhiig qabownahay
Haddaan dhimashoy ku diido
Haddaan dhalashoy ku sheegto
Haddaan dhaqashoy ku raadsho
Haddaan dheregow ku doono

DADAAL intaad dhaxal wareegtahay
Aan dhagar laguu gelin
Waa inoo dheg xumo weyn
Haddaan dhimashoy ku diido
Haddaan hdalashoy ku sheegto
Haddaan dhaqashoy ku raadsho
Haddaan dheregow ku doono

DADAAL: Inta gacan la dhowraayee
Afkuna aanu dheereen
dhalanteedka ay tahay
Haddaan dhimashoy ku diido
Haddaan dhalashoy ku sheegto
Haddaan dhaqashoy ku raadsho
Haddaan dheregow ku doono

BANAAN BAX

Habar Soomaaliyeed ayaa buraanburaysa. Waxayna tirinaysaa tixdan hoos ku qoran ee buraamburka ah,

HABAR: Dhulkoodo ay jecelyihiino
oo cadaawe dhacay
Markay dhiiladu timay

Telegram: @Somalibooks

Wada dhalaalayaan
Iyagoon halkii dhaafin
Bey kala dhaqaaqayaan
Dhakhsay u ilaabayaan
Dhibihii ay muteen

(Golahay ka baxayaan iyagoo buuqaya)

JILAKA SADDEXAAD

MUUQAALKA KOOWAAD

Duullaanbaa ka cadhooday, maqalka guddi loo diro Enefdhii oo tidhaa kala doorta Kiiniya iyo Soomaaliya docdaad rabtaan. Wuxuu u soo gelayaa Daallin.

DUULAAN: (Dhawaaq dheer)
Daallinoow! daallinoow!
Hadalkeenni darraato
Sidii aynu ku deeynay
Ma wax kalaa ka dambeeyey?

DAALLIN: Mayee, maxaa dhacay?

DUULAAN: Degmadii Enefndhii oo
Aan dab Sawaaxili siino
, Dambeed Xayle Selaase
Siduu doonayey weeye
, Soodigaa duway maahee
Arrintiiba dadbaaya
Degmadaa Enefdhii
Guddaan soo dirayaa
Kala doorta tidhaaha
(Aamus)
Haddana waan dagayaa oo
Dowgowdaan is hortaagi
Iga daadagimayso
Iyagoo dul ahaan
Danwadaagta an raacno

Telegram: @Somalibooks

Codkoodiina ku deeystay
Dunidiina ogaatay
Iga daadegimayso
Dambeedna wuu ka xumaan
Anna waan ka darraan
Dembigii ka yimaadana
Adigaa dusha saari oo
Danyaqaad u ahaan
Sidee weeye

DAALLIN: Degmadaa Enefdhii
Sidii aynu ku deeynay
Arrinteeda ku duubnay
Wuxuun baa ka dambeeyey

DAALLIIN: Wuxuun baa ka dambeeyey

DAALLIN Waxaan baa ka dambeeyey
Dalka ay kiiniyi leeday
Iyo Soomaali oo danwadaag ah
Degmadaa Enefdhii
Guddaan soo dirayaa
Kala doorta tidhaahaa
Igama daacad ahayn
Waxa aan u dan leeyay
Marka taa la dareemo
Soomaalaa deganaan oo
Illeyn waa daganyihiin
Waan ku duudsiyayaa
Ihii! Ma garatay?

DUULAAN: Sidaa noogu warran

DAALLIN: Xaylana waa dudayaayoo
Sidii aan ugu daahay ee
Degmadaa Enefdhii
Dab Sawaaxili Nuur
Ugu saaray daboolka
Anigaan ka duweeyn
Duulka waa la qasaa

Telegram: @Somalibooks

Duulka waa la qasaa
Diir madowba sidaasaan
Dambarkooda ku laastay
Dabaal joogtadii weeye
Dabar gooynta ahayd ee
Duullaanow ku caddeeyoo
Dambeed xayle u sheegoo
Oo waxay daarrantay taasu
Waa inaad ku distaa oo
Aad ka daadejisaa

(Golaha way ka baxayaan)

MUUQAALKA LABAAD

Geesta Enefdhii waxa gaadhay guddidii Ingiriisku soo diray waxana banbaxyo kaga horyimid dadkii Soomaaliyeed oo wata calanka Soomaaliyeed. Dulmar oo laba calan gacmaha ku haystaana ay horkacayso. Waxay ku dhawaaqayaan

(H E E S)

DULMAR: Guddiyeey la soo diray
Dawyadaad maraysaan
Daaraha magaalada

Degmadii miyiga tiil
Dul ahaanba Enefdhii
Danwadaagta calankeedoo
Giddi wada dul sudhan daya

DAD: Docda aanu jecelnahay
Haddii doorta lana yidhi
Waa deeq ilaahay oo
Daayin loogu mahad naqaa

DULMAR: Gudiyeey la soo diray
Dooda aanu leenahay
Dacwaddeedu waxay tahay
Dantayadu siday tahay
Aan laga dambaynayn

Telegram: @Somalibooks

Diirkiyo Afkiyo Midabkiyo
Diinta isku mida dayaay

DAD: Docda aanu jecelnahay
Haddii doorta nala yidhi
Waa deeq Ilaahay oo
Daayin loogu mahad naqaa

DULMAR: Guddiyahay la soo diray
Dulligii Gumeystaha
Ayaa nakala afduubee
Dabaradiisii goynee
Dalka waa wadaagnaa
Sidii ul iyo diirkeed
Dadkayagu mid weyaane

DAD: Docda aanu jecelnahay
Haddii doorta nala yidhi
Waa deeq Ilaahay oo
Daayin loogu mahad naqaa

(Golahay ka baxayaan)

Dambeed oo cadhaysan maqlayna Enefdhii guddi loo soo diro ayaa u imaanaaya Duullaan iyo Daallin

DUULLAAN: Hollow Dambeed?

DAALLIN: Hallow Dambeed.

DAMBEED: (Caraysan)
Degmadaa Enefdhii
Dal Sawaaxili weeye
Haddii aynu ku deynay
Guddaan soo dirayaa iyo
Maxaa doorasho keenay?
Waxa aad u danleeday
Ay kaa daarantay taasu
Arrinkaynu dedeenay
Mid daboolka ka qaaday
Oo inoo daran weeye

Telegram: @Somalibooks

Dadkii aynu dalkooda iyo
Dunjigoodii ka qaadnay
Iyadoo aan layla afduubin oo
Dambabas layla samaynin
Uma daacad helaayo oo
Iyagoo daba jooga oo
Xaqoodii u diyaara
Keligay daaficimaayo
Daallin baa i qasaaye
Duullaanow garta qaadoo
Dowga noo kala sheeg
Mindhinow!

DUULAAN: Dawga jdiin kala sheegay
Daallin baa wax qasaaya oo
Sida dabaysha xagaaga
Hadba doc u dhufanaaya oo
Garţeenii duduwaaya:
Degmadaa Enefdhii
Sidii aan ku daboolay ee
Arrinteedii ku daynay
Ayuumbay ku dadnaan
Guddaa loo dirayaa
Docday raaci lahayd
Kala doorta tidhaahda

Markaan saaka dareemay
Warkii uu daldalaayey
Dunida uu maqashiiyey
Anigoo u dudaaya
Daallin baan shir la qaaţay
Degdeg baan u waraystay
Dabuubtuu faafjnayaa
Kama daacad ahayn ee
Doc kaluu ka wareejoo
Dabbaal joogtadii weeye iyo
Dusduskuu ku shaneeyeye
Dunidu ay ku ţiqiin (Qosal)
Dabar buu guntayaa
Dabinnuu xidhayaa
Shebeg buu daadinayaa

Telegram: @Somalibooks

Dudun ciid qof ka maydhay
Dubaax miyuu u dhacaa?
Degmadaa Enefdhii
Docduu raacinlahaa iyo
Waxa uu damcay haatan
Baa dantaadii ku jirtaaye
Isagaa kaa daadejinaayee
Dambeedow ka dhegayso
(Daalljn buu eegayaa markaasuu ku odhanayaa)
Go on Daallin!

DAALLIN Carabkii la duwaayiyo
Arrinkii dalab yeesha
Doqon aan wax ogeeynoo
Damman baan garanayn,
Dadku waa arkayaa
Waa dareensanyihiino
Waa la daawanayaa
Haddana waan dadbayaa
Marna waan duwayaa
Kolla waa dagayaa
Degmadaa Enefdhii
Guddaan soo dirayaa
Docday raacilahayd
Kala doorta tidhaah
Dambabaskaan uga jeeday
Dembeedow iska dhaafoo
Sidii aan u daboolay
Aan arrinteeda ku duugnay ee
Dorraato aan ku heshiinay
Ayuumbay ku dednaan

DAMBEED: Ma sidii baa hii! ma la hubaa

DUULLAAN: Waa hubaa, waa sidii

DAMBEED/DUULLAAN & DAALLIN: Saddexdocduba waa qoslayaan
(Dambeedba golaha ayuu baxaaya)

Telegram: @Somalibooks

DAALLIN: Waa reer wada yiilay
An kala rarayaaye
Soo ruugii aan jebinjiray
Aan raabsanjiray maaha
Abidkeyba raadkaan gadaa
La ima raacdaynee
Intaan rubadka gooyaa
Ayaan raali geliyaa eh
Waa run iyo been roob
Hadduu rays la'aan da'o eh

Ku reeynayeey mid raandhijs leh
Soo talo kumaan raarin,

DUULLAAN: Muxuu duni qasayaa
,Ninku diin badanaa
Maashaa Daallin yidhaah deh
Daallinow hadalkaaga
Mar dabaysha xagaagiyo
Duufaanbaan u maleeyey
Mar jiilaalkoo dab kulayla oo
Cawasku uu dambasoobay
Gugii oo ka dambeeyey iyo
Doogsjn baan u maleeyey
Reer galbeedku ku daaqo
Diirmadowduna eedo
Wuxu yidhi:
«Degal baan gubayaa
Marka roobku da'aabaa
Doog ka soo baxayaa
Waxa daaqi biciid
Markaasaan dilayaa
Hilbihiisaan dubayaa
Daribta iyo baruurtaan
Dubayaa solayaa
Saantiisaan dildilaacino
Degmadaa Enefdhii
Baan ugu duubi Sawaaxil»
Misna wuxu yidhi:
«Anigaaba degaaya
Degeladii Enefdhii oo
Labadooda docoodba

Telegram: @Somalibooks

Waan u diidikaraa
Aniga iyo Dambeedba
Dabuubtii qalqalloocday ee
Aad hadba gees u duwaysay
Naga daadagiwayday
Madaxaa nagu daalay
Dadkuna wuu ka wareeray
Dunidu kula yaabtay
Waxa ay ku dambayn
Warka nooga dacsii

DAALLIN: Duullaanow hadalkayga
Mar hoosiiska sidiisiyo
Hadh dacaar ku malee
Marna heegada roobko
Intay meel ku yar hoortay
Hillaaceedii la waayey
Meel habaas ka karaayiyo
Hanfi uun ku malee
Hogashaa unkodaysee
Hillaaceedii la waayey
Soomaaloo u harraadan
Iyagoo handanaaya oo
Haddana hinqanaaya oo
Ku hungoobay malee

DUULAAN: (Qosol) hu, huu — maleeyey

DAALLIN: Anigoo dhulka haysta
Iyagoo heli waayey
Inta aan hordhiciisiyo
Hambadiiba ka boobay
Iyagoo heliwaayey
In habaar iyo ceeb iyo
Hiifba lay maqashiiyo
Iyada waa la hubaa
Dhulka nooga hulleel
Uba soo hoyanmaysid
Hoh iyo way iyo hoog iyo
Hugun iyo buuqba malee!

Telegram: @Somalibooks

Hawraarta indhasarcaad
Halku dhegeedii malee
Aniga wayla hudmeen
Ileeyn waa isla halkii oo
Adigaa ku hadhaayee
Hawlahaan gurigooda
Ka hagaaji sanaayiyo
Hantidii iga tiillay
Adigaa u horseed ee
Hadhuubkeeygii u qaadoo
Haaneedkeedii ahow

(Way ka baxayaan Golaha)

Soomaalidii oo si lamafilaan ah ididiiladii ay qabeen ugu hungoobay ayaa golaha isaso taagaysa; iyago murugaysan. Goluhu waa mugdi. Hees bay maqlayaan:

Aheey waheey aheey waheey
Walaalaheen baa gumeyste wiiqayaa
Weydaynayaa weetaynayaa
Waaxyaynayaa oo wadaagayaa
Aan ka waabinoy waraabayaasha
Aan ka weecinoy wadiiqo leexsan
Aan ka weecinoy wadiiqo leexsan
Shantoo isweheshaday ay wacnaydaa
Calan iney wadaagaanay wanaagsanaydaa
Ayno wadajiranoy Soomaaliweynta
Aan wadeeco tiroy cadowgu yuu ku wiirsan
Shantoo isweheshaday ay wacnaydaa
Calan iney wadaagaanay wanaagsanaydaa

(Golaha weey ka baxayaan)

Telegram: @Somalibooks

JILKA AFRAAD

MUUQAALKA KOOWAAD

Shir ayeey isugu imanayaan Duulaain, Daallin iyo Dambeed waxayna ku falanqaynayaa aayaha dambe ee Soomaalida guud ahaan sida Afrika looga horjeedinlahaa gaar ahaanan siyaasadda loo dajinaayo dhulalka Soomaaliyeed ee maqan. Golaha ayeey soo wada galayaan. Saddexdoodu way aamusasayaan, cabbaar dabadeedna iyagoo yaaban ayeey isa salaamayaan.

DUULLAAN: (Wuxuu eegayaa Daallin) Dambeed waa cabanayaa

DAALLIN: (Dambeed buu eegaqaa) hullo Dambeed?

DAMBEED: (Duullaan buu salaamayaa) Waa wanaag.

DAALLIN: Guddidii Enefdhii
Aan u soo diray gaadhay
Arrinteedii gorfeeye
Giddigood wax yar mooye eh
Soomaalidaa geyigeeda
In loo geeyo caddeeyo
Gartooday akhristeen eh
Guddonkeeda anaa leh

DAMBEED: (Qosal) HI HII!

DAALLIN: Sidii aynu ku goynay
Sow guntii noqonmayso
Huu Huum!

DAMBEED: (Qosol HI HII!

DAALLIN: Sidii aynu ku goynay
Bey gunteedu ahaan

DAMBEED: (Qosol uu kolba dhinac isu rogay) Hu, Huu. Huu....

Telegram: @Somalibooks

DAALLIN: Dambeedow is galaal
Annagaa ku gargaari oo
Garabkaaga istaagi eh
Dambeedoo is galal

DUULAAN: Huu Huu?

DAMBEED: Hayee!

DAALLIN: Soomaaloo gurmanaysiyo
Haddaad gaade ka yaabto
Kuwaa guura dhexdaadee
Geedaha kaa madhsanaaya
Dambeedow col dul gee
Hadba guuto ku saar oo
Xuduudka gaasas dul gee

DAMBEED: Hayee!

DAALLIN: Waa gelgelin biyeheedu
Dhakhso ay u gudheen
Illowsii gacalkood
Godka aan ku rideeyno
Dhulkii aan kaa gaday maanta
Taasaa sii gedmineysa

DAMBEED: HAA, HAA! waayahay,gartay!

DAALLIN: Hagaadhoodho Jabuuti
Galxood aad iska leedahay oo
Wixii aad Guraneeyso
Xooluhu kaaga gudbaan
Aad ka soo gelineeyso
Iyana gaar ahaan arniteedu
Arrinteedu goonidaa ha ahaato
Annagaa geed sare waabnayoo
Gibil kuugu xidhayna
Weligeed kuu godlinayne eh
Ha gadhoodho Jabuuti.
Fransiis ha gumeeysto.
Gaadiid qaad ha ahaato.

Telegram: @Somalibooks

Magaceedii gaboobayna
Waa inuu geddiyaa oo
Mid gadaal bax ahaada
Waa inuu u gartaa
Gaadhna uu dul dhigaa
Gacmahana inoogu hayaa
Dangaara beeyna u leenay
Anigaa gelinsiiyey
Waa ineey galbataa
Galbeed noqotaa
TOP SECRET

DUULAAN: YES!YES! Qarsoodi ha ahaato

DAMBEED: Waa yahay!
Daallinow gar wanaagsan oo
Guddoonkeedu hagaagiyo
Guud ahaan saddexdeenna
Inoo gooni ahayd
Ayaad gogoldhiggeedii samaysay oo
Guusha inoogu horseeday
Gallad weeye midkaasi
Abaal la ii galay weeye
Sidii aan u gudaayee
Taladaa aan u guntaayo
Dulucdeeda aan idin siiyo
Guud ahaan Afrikoo dhan
In shir laysugu geeyo

Gurigeyga ahaada
Hadday gaadhay adduunkoo
La garwaaqsaday taa
Guddoonshaan u ahaan
Soomaaliyoo godobteedu
Gacantayda ku taal
Inaan geeska daraa
Iima suura galayso
Marka ay guddidaasi
Ka gaddoonto dhulkayga
Gabgab aan u sameeyo

Telegram: @Somalibooks

Duulka waan gagabshaa
Anaa gaadi aqaan
Geeda dhaqsatooda
Haddii aanan gumaadin
Enefdhii gurmadkeedana
Guuta aanan ku saarin oo
Iyaga Iska horgaynin
Gudahaa isugu riixin
Gebigoodba weerar iyo
Gaasas laxaad leh
Ku galaa bixin waayo
Gadhweynaanan ahayn
Jabuutuun ila giija
Waa garkii wadnahee
Geyigeeyga dhexdiisiyo
Galbeedka isku xidhiidhsha
Badda weeye guduudan
Gacankii aan ku lahayn
Haddii aad i gabtaan oo
Aan dekeddaa gafo maanta
Goob cidlaan Fadhiyaa
, Jabuutuun iga giija
Weligeed ha ii godlanaato oo
Gaadiid qaad ha ahaato

DAALLIN: Annagaa kaa giijin Jabuuti
Ee Soomaalidaa soo gurmanaysa
Gudaha iskugu riix

DUULAAN: Soomaalloon kala goyniyo
Afrikoon kala geeyno
Ayaa xaajadaynu gurfaynay
Guddoonkeedu ahaa

DAMBEED: (Qosol) Huu. Huu!

DUULLAAN: Annagaa gondohooda
Gudummo kuugu jarayna
Soomaalidaa soo gurmanaysa
Haddaad guuto ku saarto

Telegram: @Somalibooks

Wixii aad ku gubaysiyo
Hub gaaraanu ku siin
Hub gaaraanu ku siin

DAMBEED: (Qosol)

DUULAAN: Gildhigaan iyo rayfal
Gantaalihii iswadaayee
Keligood isaganaayey
Garnaylka iyo bomkii
Aaminkaarka gurguurta
Dayaaraad wax garaaca
Gaadiidkii xooggu lahaa
Gadhwadeen ku baraaya
Giddi waanu ku siin ee
Haddii aad ku gumaado
Oo gaagna uu hadhi waayo
Weligaa garab xoogliyo
Gacan baanu ku siin ee
Nawaydiiso gargaar

DAALLIN: Weligaa garab xoogliyo

Gacan baanu ku siine
But If.....

DAMBEED: Waa hagaag! waa hagaag

(Golaha ayeey ka baxayaan)

Telegram: @Somalibooks

MUUQAALKA LABAAD

Soomaalibaa soo galeysa golaha. Idaacada Biibiisiida (BBC) ka sugaaya war ku saabsan Enefdhii

Idaacdu waxay kubillaabaysaa muusikadii ARRAWEELO: Halkan waa B.B.C. London oo aad ka dhagaysataan Mowjadaha gaagaaban 19, 16, 13, iyo 25 Mitir Baand.

RUUMA: Baadarigii baadariyada u waynaa oo ayaamahan bukay waxay dhakhtaradiisii sheegeen in caafimaadkiisu hoos u dhacaayo marba marka ka dambaysa.

LONDON: War ka soo baxay Wasaaradda Gumeeysiga ee ingiriiska wuxuu sheegay in ingiriiku ku guddoonshay Enefdhii in ay noqoto gobolka 7aad ee Kiinya.

(Soomaalidu waxay billaabaysa sawaxan, qaylo iyo banaan baxyo.)

DAD: Ha dhaco, ha dhaco Ingiriis (marar badan bay ku dhawaaqayaan)

DAACAD: (Dadkii buu soo hormarayaa, markaasu tixdan gabayga ah odhanayaa:)

Haddaad dhimato geeridu markii
Nolosha ay dhaantay
Ee dheregu xaaraan noqday
Ee dhaqasho ceebowday
Ayaa soo dhacdoo waa innaga
Dhiiladaa timi yee
Dhiggeen bayna qaybqaybiyoo
Qaaraba meel dhigay e
Dheg xumada aduunyada
Haddaan laga dhaloolaynin
Aan dhogor gobeed yeelanoo
Magac la dhowraayo
Dhulkeenaan shisheeyuhu
Saleel nacab u dhiibeen ee

Telegram: @Somalibooks

Dheehii Cirkow maalintuu
Rag is dhafoor taabto
Haddaan dhumucda iyo
Xoogayagu dhabannahays reebin
Aan lagugu dhiman waa haddaan
Lagugu dheereeyn
dhinacyada shangeesta cad
Maxaan kuugu dhignaynay?
Dhoobada Jabuutiyo Hawaas
Waa lagaa dhacay ee
Dhadig iyo labood ku xiltiroo
Dhalada kaa saara
Ayaa kuu dhammayn laa
Wixii maanta kaa dhiman eh
Haddaan dhiig laguu daadin
Aan dhagar la soo hoysan
Dheehii cirkoow maalintuu
Rag is dhafoor taabto
Haddaan dhumucda iyo
Xogayagu dhabanahays reebin
Aan lagugu dhiman waa
Haddii aan lagugu dheereeyn eh
Dhinacyada shangeesta cad
Maxaan kuugu dhiganayaa?
Dhudahaaga Enefdhii haddaan
Laga dhextaageynin
Aan lagugu dhaabayn
Carada lagu dhaloolaayo
Dhinacyada shangeesta cad
Maxaan kuuugc dhiganaynay
Dheehii cirkoow maalintuu
Rag is dhafoor taabto
Haddaan dhumucda iyo
Xoogayagu dhabannahays reebin
Aan lagugu dhiman waa
Haddii aan lagugu dheereeyn eh
Dhinacyada shangeesta cad
Maxaan kuugu dhiganeyney?

Dadaal baa dadkii ka soo dhexbaxaaya oo heeskan oranaaya dadkuna la jiibin

Telegram: @Somalibooks

DADAAL: Dhul Soomaaliyeed baad
U dhextaalo tahay oo
Inaad wada dhamaysaa
Dhalashadaa ahayd e
Dhaxal wareegimaynee
Dhiig faraha gashaay.

JIIB. Waa lagu dhashaa
Waa lagu dhaqdaa dhulkaaga
Waa lagu dhistaa
Waa loo dhintaa dhulkaaga
Dhaxal wareegimaynee
Dhimasho nolasha dhaanta
Dhaxal wareegimaynee
Dhiig faraha geshaay.

DADAAL: Dheehii cirkee
An ku dhaadanaynow
Way naga dhinnaydoo
Enefdhii la dhiibyey
Dhaxal wareegimayne
Dhiig faraha geshaay.

JIIB. Waa lagu dhashaa
Waa lagu dhaqdaa dhulkaaga
Waa lagu dhistaa
Waa loo dhintaa dhulkaaga
Dhaxal wareegimaynee
Dhimasho nolosha dhaantaa
Dhaxal wareegimaynee
Dhiig faraha gashaay.

DADAAL: Waa dhigeen raggaa
Ina dhaliilayaaye
Dheg xumo ma yeelo
Kana dhowrsanmaynee
Dhaxal wareegimaynee
Dhimasho nolosha dhaanta
Dhaxal wareegimaynee
Dhiig faraha geshaay.

Telegram: @Somalibooks

JIIB. Waa lagu dhashaa
Waa lagu dhaqdaa dhulkaaga
Waa lagu dhistaa
Waa loo dhintaa dhulkaaga
Dhaxal wareegimaynee
Dhiig faraha geshaay

DADAAL: Dhibaha Jabuutaan
Ka dhegtaagayaayoo
Dhayal buu dadkeenii
Xayle u dhirbaaxee
Dhaxal wareegimaynee
Dhiig faraha geshaay

JIIB: Waa lagu dhashaa
Waa lagu dhaqdaa dhulkaaga
Waa lagu dhistaa
Waa loo dhintaa dhulkaaga
Dhaxal wareegimaynee
Dhimasho nolosha dhaantaa
Dhaxal wareegimaynee
Dhiig faraha geshaay

Habar (Fadhiweyn) baa soo gelaysa golaha, iyadoo yaaban marba dhinac eegeeysa oo orod ku dhex maraysa iyadoo leh: war maxaa dhacay ee meesha idin tubay?
War maxaa dhacay?

DAACAD: Habartii fadhiweynee
Legdintu u fududaydeey
Intaad fooxa shidaysay
Ama aad faalka rogaysay
Miyaad fiira daraatay
Marka foore dhacaayee
Fad darruuri da'aayo
Fiintu way ka cidaa
Wajeertaynu filaynay oo
Ingiriisku faquuqay oo
Uu dhulkeenii ka fogeeyey
Bey faaladeeda hayeenee

Telegram: @Somalibooks

Miyaad fiirisay taa

FADHIWEYN: Aaah! hadal wax tarimaayee
Haddaan diriri dhicin
Haddaan taa diriri ka dhicin
Annagaa u dhaaranoo
Dhulka Soomaaliyeed
Soo dhicinayna
Tolla'ayey. tolla'ayeey!
(Hadba dhinac u carar)
Ma maantana
Tuugii Ingriisow tabaadsadow
Tagoogta iyo cududda
Isku taal kala tuurayow
Tolla'ayeey ma maantana!
Ma tii hore ayeey
Tanuna noo raacday
Tolla'ayeey ma maantana!
Tolla'ayeey ma maantana;
Tuugii Ingiriise dhulkaygii
Horay u taabay ee
Siduu doono ugu tashaday
Tolla'ayeey ma maaaantana!
Tolla'ayeey ma maantana!
Tuugii Ingiriisow
Illaah baan tuugayaayoo
Ku turunturayn.

Nin. Diiriye Halgan la yiraahdo oo yare heetinaaya ayaa ka soo dhexbaxaaya dadka oo heeskan tirinaaya.

HALGAN: Dadkeenoo amxaar dhigtii ka jariyo
Dalkeenoo sawaaxil lagu daro eey
Wey doqonniimo inaan dulqaataayoo
Dood iyo dirir kala dambeeyaa.

JIIB: (RAG) Waan dagaalamayaa daraadood
Duunyo lama hadhaayee daraadood
Waanan daafacayaa daryeelkood
Waan is duudsiyayaa daraadood

Telegram: @Somalibooks

HAWEEN: Waadna damaqdoo waanu diiree

(JIIB) Wadna damaqdoo waanu diiree
Waa la doonoo waa la diidee
U sheeg dubaaqaaga
Naga duuf nolol
Kaala dambayn maynee.

HALGAN: Danwadaagtu si kale
Ku wada degimayse
Daadsha dhiig.

HALGAN: Innagoo dawladoo hub duuban leh
Da'deen wiilalaa bayna dalasanayee
Way doqonnimo inaan dulqaataayoo
Dood iyo dirir kala dambeeyaa.

RAG (JIIB) Waan dagaalamayaa daraadood
Duunyo lama hadhaayee daraadood
Waanan daafacayaa daryeelkood
Waan is duudsiyayaa daraadood

HAWEEN: Waad na damaqdoo waanu diiree

(JIIB): Waa la doono waa la diidee
U sheeg dubaaqaaga,
Naga duuf nolol
Kaala dambayn maynee

HALGAN: Danwadaagtu si kale
Ku wada degimayse
Daadsha dhiiga.

Way ka baxayaan; golaha iyago ku dhawaaqaya: Ha dhaco Ingiriis, ha dhaco isticmaarku ha dhaco kiisa madow iyo kiisa cadiba.

MUUQAALKA SADEXAAD

Dadaal oo cadhaysan ayaa u tagaaya Daallin

Telegram: @Somalibooks

DAALLIN: Hullo Dadaal

DADAAL: Dooni maayo warkaagoo
Wajigaagaa i damqaaya
Daallinkii Ingiriisow
Darandoori xidhiidho
Daawo aan u lahaanno
Maantaa kuugu dambaysa
Ka duuduubo alaabta
Dalkayga iskaga guur
Waa inaad degdegtaayo
Dibedda uga baxdaa.

DAALLIN: Maxaa dhacay?

Dadaal golaha wuu ka baxayaa, Duullaanna wuu soo geliyaa isagii oo maqlay in Soomaalidu xidhiidhkii siyaasadeed u goysay Ingiriis.

DUULAAN: War saakuun bay u darraydeey
(Aamus cabbaar ah)
Saabuuntii xunbadeedu
Saacadda ay ku gudhaysay iyo
Soodhahaad ku tilmaantay
Soomaalidii noqon wayday

DAALLIN: IH IH

DUULAAN: Dhulkeedaad kala seertay
Haddana sii kala sooc
Ayuunbow sillen maantee
Bal sidaad odhanaysiyo
Igu biiri siyaasad?

DAALLIN: (Aamus cabbaar ah). Duulaanow
Soomaalaan kaa badiyaa
Soomaalaan kaa badiyaayoo
Sallaankii qalqallocay ee
Sariyo hoos u kacaayey
Anigaa u samaystay

Telegram: @Somalibooks

DUULAAN: Wallee Kaasaanad u fuulin oo
Adigiiba ku saaree — anigana yaa?

DAALLIN: Sallaankii qalqalloocee
Sare iyo hoos u kacaayey
Anigaa u samaystay.
Immisaan surin oodan
Xadhkaha ugu suryeeyey
Intaan saancad daboolay
Sun iyo boog ugu aasay

DUULAAN: Huu — Hu Haye

DAALLIN: Iyadoo aan salabeeyey
Intaan saac ku dul beeray
Soo socdaay ku tiraabay oo
Hadday qaar sawaxmaan
Surin oodana weeye
Saabow soo marimayno
Dabadeedna waan sasabaa

DUULAAN: Saaka oo kale maaha
Markii aad sasabaysay
Oo taasi kuu soconmayso
Daallin!

DAALIN: Waxkastoon ku sameeyo
Sida soodhaha weeye
Saaka way yara qaylin
Saadambaa la xasuusan
Saakuunna waa la illoobi
Immisaan kala saarayoo
Kala seeray dhulkooda
Haddana waan kala siibi
Enefdhiina Sawaaxil
Haddaan saami ku raacsho
Aniga iyo sanwayntii
Sow saaxiib noqonmayno
Iih!Iih!
Haddaan siiyo wajeerna

Telegram: @Somalibooks

Subagay ka lushaan baan
Suxulkayga ka leefiyaan
Sararaa ka biyeynoo
Nayroobaan iska seexan (Aamus yar)
Haddaan meel ka socdaalo
wuxuun baan sahaydaaye
Saldhiggeeda anaa lehe
Hay doqoniinayn
Saadku siinka ha raaco
(By huug or by kruug)
Bilkhasab weeye
Haygula hadlina

DUULLAAN: Daalin (aamus) daallinow soconmayso

DAALLIN: (Xoog buu u dhawaaqayaa)
Waayo

DUULLAAN: Kuuma suura gelayso

DAALLIN: (Dhawaaq) waay — by hook and by crook.

DUULLAAN: Impossible,it is impossible
Daallin, taasi kuu socon mayso
Kuuma suura gelayso
Sida aan ka filaayana
Boqolkiiba sagaashan
Soomaaleey lahayaan oo
Sawaaxili diidee (aamus yar)
Waar haddaad kaa dhulka siiso
Isaga aad sinta saarto
Kana aan isa seegno
Adiguunbaa dad samaystay — Jaalle
, Adigaa dad samaystay
Ha! Haa! All — Right!
Suntii aad qooshtay shalaytee
Soomaali aad u labeesay
Inagaa saaka cabbayna
Adigiina ku saare,
Anigana sababteedu

Telegram: @Somalibooks

Khiyaamadaad ku samaysay
Wey isahayan malaa (aamus yar)
Sahankii bari waakan
Dhulkoodii susumaaya
Russians, chinese, offering arms and aid
And all the East are here to replace us.
Haddii laynaga saaroo
Oo innagu aan ka sadcaalo
Soomaalidii carradeeda
Iyo soohdimaheeda dhammaan
Waddooyinkaan ka sameeyey
Toos uun bay u socdaanoo
Intaan saanigareeyey
Doc kasta waan u saqaafay
Sababta aan ugu jeedo
Seerfeeying baa la yidhaah
Sir qarsoodiya weeye
Siyaasadda aan u danleeyey
Sahan weeye tilmaama
Saadaasha dagaalka
Immisaan ceel ka salgaadhay
Aan ka soo saaray biyaa
Haddana aan salabeeyayoo
Dhuumo aan ku sargooyey
Sibidh aan ku afgooyey
Gegooyin baan sallaxaa
Aan dayaaradoha u sameeyey
Saabaan bayga dul yiile
Sahan weeye tilmaama
Saadaasha dagaalka
Lagu suuradinaayo
Inta aan lacag siiyo
Shaqaalaha samirsiiyo
Saliida baan qodayaa iyo
Been uun baan ku sabaayo
Sayaxeedii la waa
Kuwaan siigiyo boodhka
Kaga saydhay indhaa
Haddaan saaka ka guuro
Saabaan bayga dulyiile

Telegram: @Somalibooks

Haddii aan isa seegno
Soomli aynu collowno
Sidee baynu ka yeeli?
Salligaagi la tuur
Sixnigaagii la guuroo
Baareey siisoco weeye
Bustahaagii waa dibedda!

DAALLIN: Lagu tuur!

DUULLAAN: Oo Daallin waa ku sidee
Adigu waad u badheedhay
Inaad isa seegtaan
Anigana danahaygii!!
Daallin waa ku sidee

DAALLIN: Ninkii Seexday ee toosay
Illayn waa iska sidii

DUULLAAN: May

MAALLIN: Soomaalaan kaa badiyaa
Hawdba way ka samreen
Tanna waan sidkayaa
Silsilad weeye gundheeroo
Indhasarcaad ku aroortay (aamus)

DUULAAN: (Yaaban) haye, wad!

DAALLIN: Sug Duullaan
Sir iyo caad Afrikaankaan
Sal iyo baar u aqaan
Dadka saanta madow leh
Anigaa sumadoodiyo
Sawracooda aqaan
Waa siyaasad gundheer
Waa silsilad guntanayd oo
Indhasarcaad ku aroortay.
Arrintii sirgacnayd
Ayuumbaan suuba-salaaxay

Telegram: @Somalibooks

Sidaan kuugu tilmaamay
Ayuunbaa sal ahaan eh
Taydaas uun socodsiiyoo
Igana hayso saxeex
(Intuu qoslay ayuu yidhi)
«Ninkii seexday ee toosay
Dib miyuu u samaysmay
Soo sidiisii hore maaha?»
(Ways gacan qaadayaan)

DUULAAN: (Xiganaaya Daallin)
Ninkii seexday ee toosay
Dib miyuu u samaysmay
Soo sidii hore maaha.
Maya' dib umu hore samaysmo
Nin hadduu seexdo oo u soo tooso
Waa kii!
(Aamus yar)
Nin hadduu seexdo oo u soo tooso
Waa kii!
(Aamus yar)
Ninbaa ku maahmaahay bari
Waa sareedo adduunoo
Nin la siiyey ma seexdo»
Sadku raadin lahaa ee
Sahankaw dirilaa
Ayaa sabadaa loogu qubaa,
Nin saleelo u qaatayna
Surbacaad marimaayo
Waxan uga socdaa ama uga golleeyahay
Silsiladdii guntaneeydee
Seerayaasha adduunkiyo
Soohdimahaba u yeeshay
Siyaasaddaadii gundheer iyo
Hadalkaagi wax saaqay
Haddii aad socodsiiso
Ay Daallinow suuragalaan
Sancadaa ruushku sameeyo
Samadaa uu u diraayo
Ayuunbey la sinnaan

Telegram: @Somalibooks

Waxad sameeysay la yaab
Siddi muldhukh qayayaab
Sixir been ah kala haab
Haddii aad socodsiiso
Ay Daallinow suuragalaan
Horta gacan baan kugu siin ee
Bal sidaad odhaneeysee
Xaajadu ay ku sugnaan
Sir iyo caadba isii

DAALLIIN: Look! Mowshinkan waxaa la yidhaa Indhasarcaad

DUULAAN: Indhasarcaad! huu huu

DAALLIN: Indhasarcaad! Still going on and will ever go on

DUULAAN: Ma sidaas?

DAALLIN: (Qosal) haa waa sidaa!

DUULAAN: Hayee

DAALLIN Soomaalidaa Enefdhii
Inaan siiyo Sawaaxil
Marku Xayle Salaase
Sahankeeda ahaa
Anigoo u saxeexay baan
Sutida u qabanaayey oo
Indhahiisa sarcaad
Ayaan sadaa u sameeyey

DUULAAN: Kolkaa waa indhasarcaad

DAALLIN: Waa indhasarcaad. You got it?
Indhasarcaad No:1

DUULAAN: Haye; hii!

DAALLIN: Guddidii kala saartay

Telegram: @Somalibooks

Dhankay saami ku raacdo
Ayadoo garta soortay
Illeeyn way isa siisoo
Enefdhii way sugayeene
Soomaalaan ku dagaayey
Waan ku seexiyey taa
Irbad suuxisay weeyoo
Indhahooda sarcaad baan
Sidaa u sameeyey No. 2 Indhasarcaad
Sidaa u sameeyey No. 2 Indhasarcaad

DUULAAN: **Number three; Indhasarcaad**

DAALLIN: boqolkiiba sagaashan
Soomaalay la hayaan
Qoladii ka sindhiidhay
Waa Sawaaxiligii oo
Sadweyn baan ku qabaa
Enefdhii inaan siiyaa
Sandullay igu ahaatay
Guddidii oo garta soortay
Baan suldaaro u yeeloo
Indhahooda sarcaad
Ulakac baan u sameeyey
Number three

DUULLAAN: Number three; Indhasarcaad?

DAALLIN: Indhasarcaad! indhasarcaad!
Fari kama caweyn

DUULLAAN: Arrintu waa indhasarcaad

DAALLIN: Soomaalidaa Enefdhii
In aan siiyo Sawaaxil
Iimay suurageleynin
Haddana waan socodsiiyoo
Waa siyaasad gundheeroo
Silsiladeedu taxnayd
Midna waan sababaayo

Telegram: @Somalibooks

Waan la soo safanaayey
Midna waan sasabaayoo
Isaga waan saranseershay
Labaduba sebi weeye
Indhahooda sarcaad
Ayaan sidaa u sameeyey
Number four Indhasarcaad

DUULAAN: Indhasarcaad Number Four

DAALLIN: (Qosol) HAA HAA HAA
Intaan suryo kaleeto
Aan ku seeteeyo helaayo
Iyagoo isa seegoon
Isku saani gareeyiyo
Anigoo ka dhexsiibta
Shirka saadambe Ruuma
Sakal weeye luggocyo
Indhahooda sarcaad No!

DUULAAN: Indhasarcaada Number Five
Bending - Laaban

DAALLIN: Haye!fifth indhasarcaad

DUULAAN: Arrinta aad isaasiisay
Indhasarcaadnay dhammaano
Kulligeen ina saaqday
Arrintan aad isa siisay
Iyadaan saldhigeen
Sidee bey ku dhambayn

DAALLIN: Indhahoodii sarcaaday
Adinkoodii luggooyey
Arligoodii wareejay
Afkoodiina wareershay
Arrintaa saldhigeedu
Waa Soomaaliyoo i ogaatoo
Dabadeed amba qaada
Halkaan iinta u yeelay

Telegram: @Somalibooks

DUULAAN: Il iyo baalba ka qaadaa?

DUULLAAN: Soomaali oo aragta yaa?
Garataa? Ogaataa

DAALLIN: Eedahaan u badheedhay
Iyadoo Laygu helaayo
Aano lay maqashiiyo
Soo ayaan darro maaha?
Haddii aanan aloosin
Wax kaloo amakaagsha oo
Illowshiiyo ku keenin
Sow ayaan darro maaha?
Afrika Kiinya maaha
Iglan bay ka dhignayd
Haddii layga Irdheeyo
Ogoobey maaha dantayda
Midna aas midna ill
Axankooda fiddee
Ogaan baan u sameeyey
You understand?

DOOLLAAN: (Qosol HII HII)

DAALLIN: Midna aas

DUULAAN: Huu — Huu!

DAALLIN: Midna iil

DUULAAN: Ihi Ihii!

DAALLIN: Day ogaan baan u sameeyey oo
Ogaan baan u sameeyey

(Golaha way ka baxayaan)

JILKA SHANAAD

MUQAALKA KOWAAD

Soomaali badan baa dhegaysanaysa biibiisiida; si ay u la

Telegram: @Somalibooks

socdaan wuxuu ku dambeeyey shirkii Ruuma, 4 meelood bay reediyow ku dhegeysanayaa oo golaha ka mid ah.

Muusiqadii Arraweelo

Halkani waa BBC London ood ka maqashaan moojadaha gaagaaban ee 16; 19; 21; 25 iyo 26 mitir baandh.

Warkii dunida (warkii oo kooban);

Ameerika: Maanta Kennedy Madaxweynaha Maraykanku wuxuu la kulmayaa Mr. Krujoof.

Ruuma: Shirkii Ruuma ay isugu yimaadeen Soomaalida; Sawaaxiliga iyo Ingiriisku wuxuu ku dhammaaday Aqalka ma badh mese badh! iyadoo lagu kala cadhooday oo laysku afgaran waayey iyo gul darro.

Seddex meelood oo Reediyowyada lagu dhagaysanaayey ayaa lagu jabiyey reediyowyadii

DAD: Ha dhaco Ingiriisku! Ingiriisku ha dhaco!
Ha dhaco Ingiriisku! Ingiriisku ha dhaco!
Huu! huu! huu!
(Buuq aad u fara badan)

NIN: Ha dhaco Ingiriis!
Isticmaarku ha dhaco
Gumeeysigu ha dhaco!

GABADH: (Seddex qayd leh)
Dhulku ha la go'o

DAD: Ha dhaco Ingiriis! ha dhaco Joome!
Ha dhaco Isticmaarku kiisa madow iyo
Kiisa cadba ha dhacaan!

FADHIWEYN: Hadday meeli bukooto
Ay barartoo la arkaayo
Biyo hoosta ku leeday

Telegram: @Somalibooks

war miyeey bogsataa?
Isagaa u badheedhoo
Intuu boobay dhulkeenna
Enefdhii bixiyey
Halkii aad u bugteen iyo
Boogtii buu danqayaa
Haddana waad badqabtaan iyo
Biririxbuu ina leeyey
Bogga iyo wadnaheenii iyo
Beerkii buu kala gooyey
Soomaalaay bi i waaye
Soomaalaay bi i waaye
Ma beentaa u rixisaan?
Waar miyeydaan baranayn
Haddii ay baqayaan
Raggu hayska barjeeyo
Waa baraad la'dihiine
Burka siiya sigaarka
Bilistaa u gurmandoontoo
Ba'ayeey dooni dhulkooda
Naa kakaca xaawaleeyeey!
Ka kaca; ka kaca!
Naa ka kaca xaawaleeyeey.

(Golaha ayeey kolba dhinac u ordeeysaa)
Dadaal baa dadkii soo hormaraaya oo heeskan qaadaya:

DADAAL: Caloosheennii baa ciil ka buuxsamoo
Caabaq soo kacyeey
Carradeenii baa ciyi loo baxsho
Cadow qaybsayey.
Wallee ama lama cuyuubin oo
Enefdhii la soo celi oo
La caweeysayeey
Ama colownayoo ciduun sahayanoo
La isla cidhib baylyayey
Wallee ama calan jiroo
Caan ah baad ahaan.
Ama calal maryaa
La caynaad ahaan
Oo Ciirsi weydayey

Telegram: @Somalibooks

DAD (JIIB): Cirkaan caad lahaynow
Alla la cuskayeey
Caydhiin iyo bisayl
Miduun ku caana maal
Oo ku calool adayg

DADAAL: Walle ama cadkeenii laynoo dhigyoo
Asaageen ma cunin
Oo ka caaganaa
Ama carrabkiyo
Labada dhaan laysuma ceshoo
Laysku caw go'yeey
Wallee ama calan jiroo
Caan ah baad ahaan
Ama calal maryaha
La caynaad ahaan
Oo Ciirsi weydayey

DAD (JIIB): Cirkaan caad lahaynow
Alla la cuskayeey
Caydhiin iyo bisayl
Miduun ku caana maal
Oo ku calool adayg

DADAAL: Walee ama la colatanyo
Cirkiyo dhulkuba isla ciire oo
Laysla calaf go'yeey
Ama caano nabad
lagu wada cabyoo
La cayaar gudyeey
Wallee ama calan jiroo
Caan ah baad ahaan
Ama calal maryaa
La caynaad ahaan
Oo ciirsi weydayey

DAD (JIIB): Cirkaan caad lahaynocw
Alla la cuskayeey
Caydhiin iyo bisayl
Miduun ku caana maal
O ku calool adayg.

Telegram: @Somalibooks

Daacad oo meel dhexe joogey ayaa soo dhawaanaaya Dadkana soo hormaraaya tixdan odhanaaya:

Gortuu cabbaar tuudiyee
Gooja laga waayey
Galooftiyo irmaantii intuu
Gooni uga soocay
Guga kii dhalaayuu ku
Daray guudka tiradii ye
Haddii godudlihii Daallin
Uu gelinba cayn keenay
Gaddiisaad tagaanaa haddaad
Gartay ood ruugtay
Geed kuguma toosnoo
Adiguu kuu gabbanayaaye
Googaa kolkay cigale tahay
Aad ku geliweeyday
Soomaaliyeey gelgilo ama
Galgalo lagu gayeysiiye

***

Kulkii Geedka ay kala jartee
Guddintu naafeysay
Wuxu yidhi badhkaybaa
Galee Imma ay gooyseen
Gar la qaaday dabadeed
Sidii guurtigu caddaysay

Gocgocii la nacay baa
Nirgaha loo gudlinayaaye
Soomaaliyeey gelgilo ama
Galgalo lagu gayeysiiye

***

HALGAN - halgan baa hore u soo maraaya oo heeskan tirinaaya

HALGAN: Enefdhii baa hayaay leh oo
Nacabkii baa haleeloo
Hiil iyo hoo kama hagranaayee
Haddaan lug ka heetinaayo
Ducuun baan hidin karaa

***

Telegram: @Somalibooks

DAD (JIIB): Hagaajiyoow hagaaji
Adigaa hodanee hagaaji
Baryada ku hungoobi mayne
Hagaajiyow — Hagaaji.

***

HALGAN: Haddii dirir loo holado
Ayaa lala hadhilahaa?
Sidii taladu ugu hoostay
Soomaalidu way hungowdo
Hawd Bay weli gocanayaan
Dagaal baa nagu habboon

DAD (JIIB): Hagaajiyoow hagaaji
Adigaa hodanee hagaaji
Baryada ku hungoobi mayne
Hagaajiyo hagaaji

HALGAN: Hawaas iyo hererta maqan
Jabuuti ma heeranteen oo
Inaynaan hengelo u dhigin
Horeba waa loo ogaa
Gumaysigu uma hureen oo
Sawaaxili ma handadeen
Dhulkeenna ma haybiyeen

DAD (JIIB): Shisheeye inuu hantiyo
Tanina halis bay u tahay
Sidii loo helilahaa
Adaan kugu hallaynayaa
Hagaajiyow hagaaji
Baryada ku hungoobimayne
Hagaajiyow hagaaji

***

HALGAN: Soomaalidu ma hagradaanee
Hiirtaanyana way qabaane
Hoodana way ku biiriyaane
Haddaan nafta loo huraynin
Hadalku waxba kama taraaye

DAD (JIIB): Shisheeye inuu hantiyo

Telegram: @Somalibooks

Tanina halis bay u tahay
Sidii loo hananlahaa
Adaan kugu hallaynayaa
Hagaajiyow hagaaji
Beryada ku hungoobimayne
Hagaajiyow hagaaji

MALGAN: Hoosiisku illayn hadh maaha
Habeensay dhulkeenii hooyoo
Haddaan hanado u tisqaadin
Hub iyo ciidan loo habaynin
Haddii aan lagu hagoogan

DAD (JIIB): Shisheeyuhu in uu hantiyo
Tanina halis bay u tahay
Sidii loo hananlahaa
Adaan kugu halleynayaa
Hagaajiyow hagaaji
Baryada ku hungoobimeynee
Hagaajiyow hagaaji

(Golaha weey ka baxayaan)

MUUQAALKA LABAAD

waxa Golaha marba mid u soo gelaaya **Daallin iyo Da sa waaxili iyo Dulmar**

DAALLIN: Dhul Soomaaliyi leeday
Haddii aad ku dhawow iyo
Dhinaca saar islahayd
Wuu kaa dheeryahay maanta

DULMAR: Beentaa!

DAALLIN: Kiiniyoo dhalankaagiyo
Dhaqankaaga ahaado
Taa horaan u dhammeeyey
Adaan dhaafikaraynin
Aan kuu dhiibayo Joome

Telegram: @Somalibooks

Waxba haysdhufan maanta
Dhudhub baad ku jirtaaye
UuuuH!
Aniga oo dhagarooba iyo
Adigoo dhimandoona
Ayaad raaci dhankaa
Dhibaataan ku dulkeeni
Dhuuntaan kaa mudayaayoo
Dhjigbaa kaa shallaxlayn
Hayska daadinnin dhayda
Waar bal dhayladan eega!
Hadda dhayladan eega!

DULMAR: Adigoo dhukusaaya
Haddaad dhuumo isleeday
Dharaar weeye caddaanee
Ha dhoobdhoobin waxaan
Dhegahayga marayn
Joomoo aan isudhiibo
Waxay dhaanta iyadoo
Dhagari soo hoyataayoo
Dhuunta laysku dhuftaa ee
Inkastoon dhimanaayoon
Mudanaayo dhibaato
Soomaalaa dhalankaygiyo
Dhaqankaygu ahaa
In dhulkooda is raacoo
Aan dhankooda noqdaa
Baan ku dhaadanayaa
Oon ku dhaaranayaa

DAALLIN: Illayn dhawrsanbamayso
Illayn dhawrsanbamayso!
Alla dhoy li'idaa
Waan ku dhoofinayaayoo
Haddii aan kula dhuunto
Lagu soo dhicinmaayo

Ihi! ihi! (Dibnuhu qaniinayaa oo wuu u cagajuglaynayaa)

DULMAR: Madaxay ruxaysaa)

Telegram: @Somalibooks

DAALLIN: Hadda waan ku dhirbaaxi
Hadda waan ku dhirbaaxiyo
Indhahaa dhalanteed iyo
Dhedo ay ku hor yaaci
Haa... ah! dhug! dhug!
Ma raacaysaa Kiiniya?
Haddaad Kiiniya raaci weydo
Waan ku xidhi
Waan ku dili
Waan ku mastaafurin
Kiiniya waxaad isku tihiin
Isku dad
Isku dhar iyo
Isku dhaqan.
Haddaad raaciwaydo waan ku xiri
(Si qaylo ah ayuu u odhanayaa).
Ma raacaysaa Kiinya mise raacimaysid

DULMAR: Raacimaayo

DAALLIN: Day! Haddaba inaga daa muranka oo ma raa.
Ma raacaysaa Kiinya mise raacimaysid?
Ma raacaysaa Kiiniya
Mise raacimaysid?

DULMAR: Raacimaayo oo raacimaayo oo raacimaayo.

DAALLIN: Haysdhaqaajine joog ma raacaysaa
Kiinya? ceeb weeye waxaasiyee
ma raacaysaa Kiiniya?

DULMAR: Raacimaayo oo raacimaayo oo raacimaayo.

DAALLIN: (Xadhig buu jeebka kala soo baxayaa)
Bal dhegaatigaan eeg

DULMAR: (Way ka dhaqaaqaysaa)

DAALLIN. Hays dhaqaaline joog.
Dhug dhugtay haysaa

Telegram: @Somalibooks

Oaallin; Dab sawaaxili iyo Askartiisii golaha ayeey ka ba xayaan).

Dulmar ayaa Heeskan tiraanyada leh qaadaysa; iyadoo xadhig ku xidhanyahay

DULMAR: Gobannimada iyo guusha hesheen
Geedohoodii baa soo gadaal baxee
Ma gugaa da'aan ka go'doomayaa
Geeri iyo magli' anigaa ku go'ay
Geeri iyo magli,i angaa ku go,ay
Ma gudaa abaal ma la iigalaa
Mise waan gadaa ii garaabiwaydee
Geeri iyo magli'i anigaa ku go'ay
Geeri iyo magli'i anigaa ku go'ay

* * * * * * * *

Gacmahayga iyo garbahoodiyow
Gumaysigu aniguu i gaboodsadaa
Gaadiid sidii guudka iga raray
Geeri iyo magli'i anigaa ku go'ay
Geeri iyo magli'i anigaa ku go'ay

* * * * * * * *

Gacmahayga iyo garbahoodiyow
Gumaysigu aniguu i gaboodsadaa
Gaadiid sidii guudka iga rara
Ma gudaa abaal ma la ii galaa
Mise waan gadaa ii garaabiweeydee
Geeri iyo magli'i anigaa ku go'ay
Geeri iyo magli'i anigaa ku go'ay
Geddiga maalintii howl galaa baxsho
Waa ii galab carrow gabbal iigu dumay
Iyo guura dheer waagu galalac yidhi
Geeri iyo magli'i anigaa ku go'ay
Geeri iyo magli'i anigaa ku go'ay

* * * * * * * *

Ma gudaa abaal ma la ii galaa
Mise waan gadaa ii garaabiweeydee
Geeri iyo magli'i anigaa ku go'ay
Geeri iyo magli'i anigaa ku go'ay

Telegram: @Somalibooks

Day ma raacaysaa hadda
Aan kaa daayo xadhiga ee?

DULMAR: Raacimaayo oo raacimaayo; raacimaayo baa askartii dab Sawaaxili la socotay iyo Daallin ay ku xidhayaan Dulmar oo u dhiibayaan dab Sawaaxili Nuur.

DAB: Kol caddaa kol casaa
Ma cadceed duhur joogtoo
Daruur caad leh gashaa
Cududeheeda bal eega
Cududeheeda bal eega
Cuddoonaa shilisaa
Ma cillaankii xinniyoo
Cusbur bey mariyeen?
Haddaan caasha ku taabto
(Caashuu taabanayaa)
Malaha waabad cadhoon
Caqli gaabanidaa oo
Yeeyga kaa celinaaya?
Wallaahi waan ku cuntuugi
Dabadeed ku calaashan
Haddaad dhaafto cunaa
Calooshaad ku jirtaa
Imminkaad leeday caaqiibo
Imminkaad leeday caaqiibo
Yaray haysku ciyaarine
Maad soo raaci ciddaydoo
Mawada ciidansannaa?
Immikaad leedahay caaqiibee; anigu
Waanigaa hadal ku idhi
Wallaahi in aan ku cantuugi
Dabadeed ku calaashan
Calooshaad ku jirtaa
Ogow Enefdhiiyey
Caawiyo berriba aniguun baa ku leh

DULMAR: Wallee haddii cirku dhanka kale iska rogaayo; Cadceeduna ay madoobaanaysana isku cid iyo isku ciirsi midna ma nihin!

Telegram: @Somalibooks

Geyigii hooyo baa layga goynayaa
Waxa lay gudbinayaa guri kaloo
Ma geyoo anigu waan ka giigayaa
Ma gudaa abaal ma la ii galaa
Mise waan gadaa ii garaabiweeydee
Geeri iyo magli'i anigaa ku go'ay

(DAAHAA LA XIDHAYAA)

(D H A M M A A D)

Telegram: @Somalibooks